

Qaabka loo Diyaariyo loona Kaydiyo Caanaha Budada ah ee Dhalaanka Kaddib marka Daadku dhaco

Qoysaska daadku saameeyay sidoo kalena isticmaala caanaha caruurta ee budada ah, caanaha horey loo sii diyaariyay ee diyaarka u ah in caruurta la siiyo ayaa u ah xulashada ugu ammaanka badan. Kaddib marka daadku dhaco, biyaha tuubada ama ceelku waxay noqon karaan kuwo aan ammaan ahayn in lagu qaso caanaha budada ah ee caruurta. Caanaha horey loosii diyaariyay in canugga la siiyo waa caano dareere ah oo canugga la siin karo ayada oo aan biyo lagu darin. Haddii qoysku doorto inuu isticmaalo caanaha caruurta ee budada ah, raac talaabooyinka si aad u diyaarsato si ammaan ahna ugu kaydsato.



Talaabada 1

Nadiifi goobta aad ku diyaarinayso. Ku dhaqo gacmaha saabuun iyo biyo ama isticmaal gacmo nadiifiye alkolo ka samaysan kaasoo ugu yaraan 60% alkolo ah. Iisticmaal dhalo nadiif ah si aad ugu diyaariso caanaha canugga.



Talaabada 2

Iisticmaal biyaha dhalooyinka kujira si aad caanaha u diyaariso ilaa maamulka deegaanku ka sheegayaan in biyaha tuubadu ammaan yihiin oo la cabi karo.

Talaabada 3



Iisticmaal biyaha saxda ah iyo caanaha ee ku qoran tilmaamaha ku dul qoran weelka caanaha. Cabbir biyaha marka koowaad kaddibna ku dar budada caanaha canugga adiga oo isticmaalaya qaadada.



Talaabada 4

Ayada oo daboolku ku xiran yahay, rux caanaha canugga ee dhalada kujira si aad u qasto.



Talaabada 5

Kadib marka aad siiso, xaqiiji in aad si adag ugu nadiifiso dhalada iyo cinjirkeeda biyo iyo saabuun ammaan ah.

U isticmaal si Dhakhso ah una Kaydi si Ammaan ah

- Isticmaal caanaha canugga ee aad diyaarisay 1 saac gudihiis laga bilaabo marka aad bilawdo quudinta iyo 2 saacadood gudahood marka la diyaariyo.
- Haddii aadan ku isticmaalayn caanaha diyaarsan 2 saacadood gudahood, isla markaaba ku kaydi talaagad waxaadna ku isticmaashaa 24 saacadood gudahood.
- Marka aad qasayso caanaha caruurta, samee kaliya inta canuggaagu cabayo si aanay kaaga khasaarin.
- Daadi caanaha kusoo hara dhalada kaddib marka aad canuggaaga siiso. Talaagadda ha gashan si aad hadhow u isticmaasho.

Xasuusnoow

- Ha siin hana u diyaarin canuggaaga caanaha guriga lagu diyaariyo. In aad canuggaaga siiso caano aad guriga ku diyaarsatay waxay u horseedi kartaa dhibaatooyin waaweyn oo dhanka caafimaadka ah.
- Ka dhig daboolada iyo qaadooyinka caanaha budada ah kuwo nadiif ah oo qalalan, waxaadna dabooshaa weelasha caanaha sida ugu dhakhsaha badan. Ku dhex rid qaadada weelka dhexdiisa.
- Daawo oo dhegayso macluumaadkii ugu danbeeyay ee kaaga imaanaya maamulka deegaanka kaasoo khuseeya badqabka ilahaaga biyaha.

Ma Ogtahay?



Marka biyo ammaan ah aan la heli karayn, dhalooyinka iyo cinjirka dhalooyinku ammaan ma noqonayaan sababtoo ah wey adag tahay in la nadiifiyo. Haddii aad isticmaalayso dhalada biyaha ee la iska tuuro ama weel cunto oo kale oo ammaan ah si aad caanaha ugu diyaariso, ku shub caanaha furka dhalada aad ka furtay si aad canugga caanaha ugu siiso. Kaddib marka aad caanaha siiso, tuur furka kaddibna isticmaal fur cusub markasta oo ada caanaha siinayso.